Waa Maxay Uumiga Aan la Rabin?

RESIDENTIAL



Kiimikooyinka ku daatay ama lagu qubay dhulka ayaa wasakhayn kara carrada iyo biyaha dhulka hoostiisa. Iskudhisyada orgaaniga ah ee aan degganayn (VOCs) waa kiimikooyin si sahlan ugu uumibaxa hawada.

VOCs ka soo uumi baxaya ciidda wasakhaysan iyo biyaha dhulka hoostiisa ayaa kor ugu soo kaca dusha sare ee dhulka. Haddii uumigani soo gaadho dhisme, wuxuu ka gali karaa dillaacyada seeska, qasabadaha agagaarkooda, ama nidaamka bullaacadaha. VOCs ayaa markaa wasakhayn kara hawada gudaha. Nidaamkan - marka wasakhawgu ka yimaado hawada carrada ee uu yimaado hawada gudaha - ayaa loo yaqaan wasakhawga hawada gudaha.

VOCs-yada laga helo inta badan marka ay dhacaan uumiga aan la rabin Minnesota waa xaydh-tiraha warshadeed trichloroethylene (TCE), milaha nadiifinta qallalan tetrachlorethylene (perchlorethylene, PCE), iyo qaybaha batroolka. Tusaalayaal guryaha kuwaasi oo noqon kara ilaha VOCs waa shirkadaha warshadaha, kuwa nadiifka qallalan, iyo dukaamada birta.

Maxay tahay ujeedada baaritaanka uumiga aan la rabin?

Dhismayaasha waxaa laga baaraa uumiga aan la rabin si loo go'aamiyo haddii ay jirto halis ah gelitaanka kiimikada uumiga ama suurogalnimada dhibaato caafimaad oo ay leedahay. Si ay u jirto walwal xagga caafimaadka ah, uumiga wasakhaysan ayaa soo galay hawada gudaha isagoo ah heerar walwal leh OO ay dadkuna ay noqoto inay hawada neefsadaan iyadoo wasakhaysan muddo. Halista caafimaad ee ka yimaad uumiga aan la rabin sida badan waa qaar hoose, laakiin waxa muhiim ah in tallaabooyin loo qaado yaraynta ama suulinta uumiga aan larabin halkii ay suurogal tahay.

Maxaa dhacaya haddii uumiga aan la rabin laga shakisan yahay inuu jiro?

Uumiga aan la rabin ayaa la baaraa iyadoo la qaadayo muunado bey'eed si looga raadiyo jiritaanka kiimikooyin iyo xaddiyo kiimikooyin ah. Haddii kiimikooyinka ay u dhaw yihiin dhismayaasha, waxaa lagama maarmaan noqon karta in laga qaado muunado uumiga carrada islaab-hoosaadka ee dhismaha hoostiisa. Muunadaha islaab-hoosaadka waxa lagu qaadaa iyadoo la daloolinayo dalool yar seeska dhismaha. Muunadaha gudaha ayaa sidoo kale la qaadi karaa. Muunadaha waxa lagu qaadaa weel gaar ah (fiiri sawirka bidixda).

Maxaa la sameeyaa si loo yareeyo uumiga aan la rabin oo loo hagaajiyo tayada hawada gudaha?

Haddii la ogaado in uumiga ciidda ee gurigaagu ka hooseeya heerar walwal leh, MPCA ayaa bixin doonta rakibaadda nidaam lagu yaraynayo si loogu laydhiyo uumiga hawada dibadda. Ugu dhawaan xaaladaha oo dhan, tan waxaa lagu sameeyaa iyada oo aan wax kharash ah ugu kicin mulkiilaha guriga. Nidaamyadan yaraynta waa kuwa la mid ah kuwa loo isticmaalo in lagaga ilaaliyo radon inay guryaha soo gasho. Aad qaali uma aha in lagu shaqeeyo, way fududahay in la nashqadeeyo oo la rakibo, waana xal la caddeeyey dhibaatooyinka radon iyo uumiga aan la rabin.

Biyaha aan cabbayo ma saamaysaa?

Uumiga aan la rabin waxa inta badan la xidhiidha wasakhaynta biyaha dhaw ee dhulka hoostiisa ama ciidda. Biyaha cabbitaanka ee degmadu waxay badanaa ka yimaadaan ceelal qoto dheer ama biyo dusha sare ah, waxaana si joogto ah looga baaraa wasakhaynta si loo hubiyo in ay buuxiso heerarka. Haddii aad u isticmaasho ceel gaar ah biyaha la cabbo oo dhismahaagana ku socoto baaritaanka uumiga aan la rabin, nala soo xiriir wixii macluumaad dheeraad ah.

Booqo websaytka MDH si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan:

- fahmidda natiijooyinka tijaabinta uumiga aan la rabin
- ayey MDH u tixgalinaysaa inay aad ugu nugushahay kiimikooyinka halisaha caafimaad ee uumiga
- aan la rabin ee laga helo goobaha uumiga aan la rabin - TCE iyo PCE

Radon-ta iyo Guryaha

Radon sidoo kale wuxuu ka soo galaa dhismaha ciidda. Radon waa gaas aan ur lahayn, shucaac leh oo si dabiici ah carrada ugu jirta. Radon waa tan koowaad ee sababta kansarka sanbabada ee dadka aan sigaarka cabbin. Gobolka Minnesota, qiyaastii 40% guryaha ayaa leh heerar radon oo halis wayn ku ah caafimaadka. Waxaa jira fursado loo heli karo mulkiilayaasha guryaha si loo yareeyo khatarta radon ee guryahooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan radon iyo tijaabinta radon, booqo Radon in Homes (https://www.health.state.mn.us/radon).

AGABKA TIJAABADA RADON OO BILAASH AH!

Haddii aad ku jirto ama ku dhawdahay goob baaritaan lagu samaynayo uumiga aan la rabin, isticmaal macluumaadka xiriirka ee hoose si aad u codsato agabka tijaabinta roadon oo BILAASH AH. Fadlan ku dar cinwaankaaga si aanu ugu dirno agabka tijaabinta xagga gurigaaga.

Su’aalo? La xidhiidh Waaxda Caafimaadka ee Minnesota

Cutubka Qiimaynta Goobta iyo La-talinta
Wac (651) 201-4897 ama iimeyl u dir health.hazard@state.mn.us
https://www.health.state.mn.us/communities/environment/hazardous/topics/vaporintrusion.html

La diyaariyey iyada oo iskaashi lala samaynayo
Wakaaladda Maraykanka ee Maaddooyinka Sunta ah iyo Diiwaanka Cudurrada Ganacsiga
Guriga la dego 3/13/2019
Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac 651-201-4897.